Barne-, ungdoms- og familiedirektoratet

# HAY'ADDA MAADINTA CARRUURTA

sida danta ilmuhu ku jirto



# HAY’ADDA MAADINTA CARRUURTA EE NOORWEY

Hay’adda maadinta carruurtu waa inay carruurta, dhallinyarada iyo qoysaska siiso caawimo iyo taageero marka xaaladda gurigu adagtahay ama ilmuhu sababo kale dartood u baahanyahay in maadinta carruurtu caawiso (tusaale ahaan dhibbaatooyin habdhaqan, maandooriye). Waalidka ayaa ka masuul ah inay carruurtooda siiyaan daryeel. Laakiin haddii ay waalidka ku adkaato ama dhibbaato haysato, waa in hay’adda maadinta carruurtu caawiso si carruurta iyo dhallinyaradu u helaan daryeelka ay u baahanyihiin.

Hay’adda maadinta carruurtu waa in ay ilaaliso in carruurta iyo dhallinyarada ku dhex nool xaalad dhaawac ku keeni karta caafimaadkooda iyo horumarkooda, ay xilli sax ah helaan caawimo iyo daryeel, kana qaybqaadato in carruurta iyo dhallinyaradu helaan korniin sugan.

**Sida danta ilmuhu ku jirto**

Hay’adda maadinta carruurtu waa in ay ka duusho waxa danta ilmuhu ku jirto. Marmar waxay arrintaasi ka hor imanaysaa aragtida waalidka. Hay’adda maadinta carruurtu waa in ay markeeda horeba caawimo iyo taageero siiso waalidka si ay u noqdaan dad daryeeli kara carruurtooda. Haddii caawimadaasi ku filayn, ama dhibbaatooyinka waalidku aad u weynyihiin, waxa iman karta in carruurta la dejiyo meel ka baxsan guriga muddo gaaban ama dheer.

## XAALADAYADU WAY ADAGTAHAY. MAADINTA CARRUURTU MA NA CAAWIN KARTAA?

Qof kasta waxa oo mari kara xilliyo ay xaaladiisa nololeed adagtahay, oo ay u baahanyihiin in la siiyo caawimo iyo taageero si ay u ilaaliyaan daryeelka carruurtooda. Mararkaas oo kale waxa hay'adda maadinta carruurta ku waajib ah inay caawiyaan qoyska.

Dad badan waxa la adag inay la xidhiidhaan hay'adda maadinta carruurta, maadaama ay ka cabsanayaan in laga qaato carruurta. La-wareegidda masuuliyadda daryeelku waa talaabo aad ugu culus ilmaha iyo waalidkaba. Taas darteed waa inay jiraan sababo macquul ah si loogu talaabsado arrintaas.

Haddii aad caawimo ka rabtid hay'adda maadinta carruurta waxa aad wici kartaa degmada aad degantahay waxaanad ka codsan kartaa balan. Marka aad timaadid kulan wadahadal ah waxa adiga iyo hay'adda maadinta carruurtu u kuurgeli kartaan baahida caawimo iyo taageero ee qoyskaagu u baahanyahay.

Inta badan, dadka caawimada ka hela hay'adda maadinta carruurta waxa lagu caawiyaa guriga si carruurta iyo waalidku u wada noolaan karaan. Arrintaas waxannu u naqaanaa waxqabad caawimo ah, waxaana tusaale ahaan ka mid noqon kara:

- talooyin iyo tilmaamo la siinayo qoyska
- kulanno kooxo waalid ah
- xidhiidhiye taageero ah
- ka taageerida lacagta booska xannaanada carruurta
- ka taageerida lacagta dugsiga wakhtiga firaaqada (SFO/AKS)
- ka taageerida lacagta hawlaha wakhtiga firaaqada ama wax kale
- nasinta dhammaadka toddobaadka/guri booqasho



**Waxa iyana suurtagal ah in caawimo la weydiisto hay'adaha maadinta qoyska.**

Halkaas ayey qoysasku ka heli karaan talooyin iyo wadahadalo ku saabsan dhibbatooyinka maalmeed, iyo marka ay jiraan arrimo adag, khilaafyo ama xaalad kacsan oo ka dhex taagan qoyska.



Boqolkiiba 40 dhammaan carruurta ay hay'adda maadinta carruurtu caawisay 2012-kii waxay heleen talooyin iyo tilmaamo. Boqolkiiba 20 waxay heleen fursad ah guri booqasho halka boqolkiiba 19 heleen waxqabad taageero dhaqaale ah. Ilaa iyo 31-kii desembar 2010 carruur dhan 30 316 ayaa helay waxqabad caawimo ah iyagoo jooga guriga. In ka badan 80 % carruurta ay hay'adda maadinta carruurtu ka hawlgasho, waxay helaan waxqabad aan qasab ahayn iyagoo jooga guriga. (hay'adda tirakoobka)

## WAXAAN KA WERWERSANAHAY ILMO AAN AQAAN. MA HABOONTAHAY IN AAN LA XIDHIIDHO HAY'ADDA MAADINTA CARRUURTA?

Waxa laga yaabaa inaad hooyo ahaan ama aabbe ahaan ka cabsanaysid inaad la xidhiidhid hay'adda maadinta carruurta. Waxa laga yaabaa in hadaad tahay qaraabo, deris, macalin ama wax la mid ah aad ka walaacsantahay oo ka cabsanaysid inaad soo dhexgashid.

Haddii aad la xidhiidhi weydo waxa natiijadu noqon kartaa in carruurta iyo waalidku heli waayaan caawimada iyo taageerada ay u baahanyihiin, ee ay xaq u leeyihiin marka la eego sharciga.

Ha ka cabsan inaad la xidhiidhid hay'adda maadinta carruurta ee kuugu dhow. Wac oo u sheeg dhibbaatooyinka/werwerkaaga. Khabiirada ka tirsan hay'adda maadinta carruurtu waxay ku siin karaan talooyin wacan oo ku saabsan waxa aad samayn karto iyo qaabka ay u caawin karaan adiga iyo qofka aad ka werwersantahay.

Haddii ay kugu adagtahay inaad la xidhiidhid hay'adda maadinta carruurta, waxa arrintaas kaa caawin kara macalin, kaalkaalisada caafimaadka, la-taliye ama dad kale oo waaweyn.

**Ma is qarin karaa markaan soo sheegayo?**

- Adiga ayaa dooran kara inaad is qarisid markaad la soo xidhiidhaysid hay'adda maadinta carruurta.
- Waxa aad dooran kartaa inaad kiiska soo sheegtid adoo isqarinaya, si hay'adda maadinta carruurta iyo waalidka midkoodna u ogaan qofka soo sheegay. Ogow in waalidka la tusi doono farriinta, markaa haddii aad tusaale ahaan qortid inaad tahay habaryarta ilmaha, si fudud ayaa laguu ogaan karaa.
- Haddii aad dooratid inaad isqarin, waalidku waxay ogaan karaan qofka warka u soo diray hay'adda maadinta carruurta.

## MAXA DHACAYA MARKA HAY'ADDA MAADINTU CARRUURTU HESHO FARRIIN WERWER AH OO KU SAABSAN ILMO AMA QOYS?

Hay'adda maadinta carruurta waxay u soo dhaca telefoon ama warqad cid kaga sheekaynayso ilmo ama qoys ay umalaynayaan in xaaladoodu wacnayn. Waxa arrintaas loo yaqaan farriin werwer. Hay'adda maadinta carruurta waxa waajib ku ah inay eegaan farriinta werwerka oo qiimeeyaan in kiiska lagu sameeyo baadhitaan iyo in kale.

Haddii hay'adda maadinta carruurtu garato in baadhitaan lagu sameeyo kiiska, waxa dhici karta in hay'adda maadinta carruurtu la xidhiidho qofkii farriinta soo diray si ay u hesho warbixin dheeraad ah oo ku saabsan sababta loo soo diray farriinta werwerka.

Marar kale hay'adda maadinta carruurtu uma baahna arrintaas, waxaanay toos ula xidhiidhaa waalidka ilmaha si ay u baadho kiiska. Waxa markaas oo kale waalidka loogu yeedhaa wadahadal ka dhacaya xafiiska ama guriga. Haddii hay'adda maadinta carruurtu ay guriga ku booqanayso waalidka, waxa marka hore loo dirayaa warqad sheegaysa in hay'adda maadinta carruurtu ku imanyso booqasho.

Marka waalidku la kulmaan shaqaalaha hay'adda maadinta carruurta, waxay helayaan xog ku saabsan farriinta werwerka, waxaana inta badan loo oggolaadaa inay akhristaan. Kadib marka qofku ogaado xog dheeraad ah oo ku saabsan farriinta werwerka, waxa hay'adda maadinta carruurta iyo waalidku ka wadahadlaan waxa la soo qoray. Inta badan waxa hay'adda maadinta carruurtu iyana la hadashaa dadka kale ee yaqaana ilmaha iyo qoyska, sida rugta caafimaadka carruurta, xannaanada carruurta, dugsiga, adeega Waxbarasho-Nafsadeedka (PPT) iyo meelaha la midka ah.

Baadhitaankaas ayey hay'adda maadinta carruurtu ku ogaanaysaa inay u baahanyihiin inay sii dabogalaan kiiska iyo in kale.



# XUQUUQDA WAALIDKA IYO MASUULKA

Waalidka ilmuhu la deganyahay iyo waalidka isna qayb ku leh masuuliyadda waalidnimada ilmaha, ayaa qayb ku leh kiiska hay'adda maadinta carruurta. Haddii aad qayb ka tahay kiiska waxa aad xaq u leedahay;

- Inaad eegtid dhukumentiyada kiiska
- Inaad ka cabatid go'aanka hay'adda maadinta carruurta
- ka qaybgalka kulanka Guddida gobolka oo aad dhiibatid aragtidaada
- Caawimo qareen (looyar) oo bilaash ah xilliga kiisaska guddida gobolka iyo maxkamadaha
- Ka cabashada go'aanka guddida gobolka iyo in racfaan u qaadatid maxkamadaha
- Codsatid in la laalo go'aan ku saabsan la-wareega masuuliyadda daryeelka



## HESHIISKA CARRUURTA EE QARAMADA MIDOOBAY

Heshiisku waxa dhigayaa in dhammaan dadka ka yar 18 sanno jir ay yihiin carruur, oo ay hoos imanayaan Heshiiska carruurta.

**XUQUUQDA CARRUURTA:**

- Carruurtoo dhan waxay ku dhalatay xornimo waanay simanyihiin.
- Carruurtoo dhan waxay xaq u leedahay magac iyo waddan.
- Carruurtoo dhan waxay xaq u leedahay in la ilaaliyo.
- Carruurtoo dhan waxay xaq u leedahay caawimada caafimaad ee ugu fiican iyo cunto iyo cabitaan ku filan.
- Carruurtoo dhan waxay xaq u leedahay in la dhegaysto oo la tixgeliyo.
- Carruurtoo dhan waxay xaq u leedahay inay aado dugsi.
- Carruurtoo dhan waxay xaq u leedahay ciyaar, wakhti firaaqo iyo nasasho.
- Carruurtoo dhan waxay leedahay xuquuq isku mid ah

---

## QAABKEE AYAAN ULA XIDHIIDHAA HAY'ADDA MAADINTA CARRUURTA?

**Warqad diris**

Waxaad boosta ku soo diri karaa farriin werwer oo qoraal ah, adoo qoraya warqad aad ku sheegaysid inaad u baahantahay caawimo oo aad rabtid inaad la kulantid hay'adda maadinta carruurta.

Farriin qoraal ah ayaad ku soo diri kartaa boosta haddii aad werwer ka qabtid ilmo. Markaa waa inaad sheegtid waxa dhibtu tahay, cidda ay khuseyso iyo qaabka hay'adda maadinta carruurtu ula xidhiidhi karto qofkaas.

**Soo wac**
Sida kale waxaad wici kartaa hay'adda maadinta carruurta ee ka tirsan degmada uu ilmaha/dhallinyaradu joogo. Markaad soo wacdid waxaad la hadli kartaa qof ka shaqeeya hay'dda maadinta carruurta oo aad u sheegi kartid waxaad ka werwersantahay.

**Kulan**
Samayso balan wadahadal. Xafiisyo badan oo ka tirsan hay'dda maadinta carruurta ayaa wakhti u qoondeeyey wadahadallo lagu bixiyo talooyin iyo tilmaamo. Haddii aad rabtid, wac hay'dda maadinta carruurta ee ka tirsan degmadaada oo weydii inay hayaan wakhti bannaan. Kulannadaas waxa aad kaga hadli kartaa waxa aad werwerka ka qabtid, waxaana heli kartaa tilmaamo ku saabsan waxa aad samayn kartid. Waxa aad soo wadan kartaa qof kuu noqda taageero.

HADDII AAD U BAAHANTAHAY TURJUMAAN, WAAD CODSAN KARTAA

WADATASHI QOYS
Caadi ahaan hay'dda maadinta carruurta ayaa go'aamisa waxa laga yeelayo kiisaska maadinta carruurta.

Qoysaska ku sugan xaalad adag waxa iyana laga caawin karaa inay sameeyaan wadatashi qoys. Wadatashi qoys waa kulan ay isugu imanayaan qoyska, qaraabada iyo dadka kale ee u muhiimka ah ilmaha. Qoysku waxa uu ku heshiinayaa waxa la haboon in la sameeyo si ay u wacnaato xaalada ilmaha iyo qoysku, waxaanay arrintaas la eegayaan hay'adda maadinta carruurta.

Haddii laguu geystay dhacdo cabsi leh ama aan wanaagsanayn, ama haddii adiga ama qof aad taqaanid dhib ka soo gaadho qoyska – la soo xidhiidh maadinta carruurta heeganka ah ama **telefoonka -ogeysiinta 116 111**

dinamo / ILLUSTRASJONSFOTO: TINE POPPE

Barne-, ungdoms- og familiedirektoratet

**Postadresse**
Postboks 2233
3103 Tønsberg

**Besøksadresse**
Stensberggaten 27
0170 Oslo

**bufdir.no**

Trykk: Flisa Trykkeri AS